IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA
# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 10aad Muqdisho 1 Maarso 1982 L. 3

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S QIIMADU Waa 5 Shan lambar walba—RUKUNKA: Sannadii waa Sh. So. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Sh. So. 300 Rukunka la weydiisto waqtiga 'oo gooyey wa. xuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa 2 laba Ih. Rukunka & qorista ika waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 1 ee 11 Jan. 1982, Oggolaan shaha Miisaaniyadda ku talogalka ee BOG. 170
Sannadkan 1982.—

### QAYBTA LABAAD

### XEER

W. M.

### QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA

W. M.

Wakaaladda M. Qaranka

SHARCI Lambar 1 Taariikh 11 Jen. 1982 Oggolaanshaha

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga.

Miisaaniyadda ku talo galka ee Sannadka 1982

WUXUU SOO SAARAYAA: Sharciga Soo Socda:—

Qod. 1aad

Dawladda waxaa awood loo siiyey in ay soo ururiso Dakhliga iyo in ay bixiso Kharashka ku qoran Miisaani yadda ..., iyadoo la raacayo Xeerarka habka iyo ... u degsan maamulka Xisaabaadka iyo hantida Dawladda.

Qod. 2aad

1. Isbeddelka Guud ee Miisaaniyadda iyo kuwa ku saabsan madaxyada Miisaaniyadda waxaa lagu soo saarayaa Sharci.
2. Kala wareejinta ku saabsan madax xigeennada isku madax ah waxaa awood u leh Wasiirka Wasaarad da Maaliyadda, isagoo dhegeystay soo jeedinta Wa siirka ay arrintu khuseyso.
3. Kala wareejinta ku saabsan xarfha hoos yimaada madax xige walba ee Miisaaniyadda Dawladda Dhe xe waxaa awood u leh Wasiirka Wasaarad walba. Kala wareejinta ceynkan oo kala ah ee Miisaaniyad da Dawladda Hoose waxaa awood u leh Guddoomi yaha Golaha Horumarinta ee Gobolka.

Qod. 3aad

Wasiirka Maaliyaddu wuxuu awood u leeyahay inuu Xeyd ka dhigo, haddii loo baahdo, dhammaan ama qe ka mid ah Lacagta ku jirta madax xige walba ee Miisaaniyadda.

Qod. 4aad

Waxaa la baabiiyey Sharci kasta oo ka soo horjee da ... aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 5aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Jennaayo 1982 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 11 Jen. 1982.

MADAXWEYNAHA JDS,
(Maxamed Siyaad Barre)

# WASHRKA MAALIYADDA

## WARBIXINTA MIISAANIYADDA 1982 EE WASHRKA MAALIYADDA

Waxaa ii Sharaf ah, waajib dastuurina igu ah, dan ta maamulka Dawladduna ay ifareysaa in Golaha sharafta leh aan horkeeno Miisaaniyadda sannadka soo socda 1982ka, anigoo codsanaya in nalco guddoomiyo.

MIISAANIYADDA DAWLADDA DHEXE:

Sida aad u aragtaan Miisaaniyadda 1982, Kharash lagu dabooli lahaana waxaa weeye Sh. So. 3 130.403.710. Sida aad u aragtaan waxaa weeye Miisaaniyad ay is waafaqsan yihiin dakhligeeda iyo kharashkeeda —

Dakhliga iyo kharashkuba waxay ku fadhiyaan xi saab si dhab ah loo darsay lagana taxadaray in is dhi midi ay timaalo si ayan u dhicin in kharashka dib loo dhimo shaqadii loogu tala galana ay curyaanto, ama Bankiga Dhexe Miisaaniyadda laga kabaa, sidii horeba ay u dhici jirtay, taasoo aan ognahay dhibaatada weyn ee ay u keeni jirtay qiimaha Shilinka Soomaaliyeed ama ascaarta Dalka gudihiisa.—

Miisaaniyaddu waxay u qaybsan tahay Saddex mee lood, kuwaasoo ah:

b) Mushaarka guud ee Shaqaalaha Dawladda iyo gunnooyinka la xiriira oo dhan Sh. So. 1.458.842.242 una dhiganta 46%

t) Makhaasiirta maamulka (General services), caddadeedu tahay Sh.S. 1.314.918.410 oo u dhiganta 42%

j) Horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada, ma shaariicda la xiriirta, kharajka ku baxayna uu yahay Sh.So. 356.643.058 u dhima 12%

Saad aragtaan, korarka Miisaaniyadda sannadka 1982ka aad buu uga hooseeyaa kii sannadkii hore saba

waad hal Milyaardi sababtoo ah in la kaamilahayey ku talagal si dhab ah uga dhinnaa miisaaniyadda. Mii saaniyadda 1982 culeys uguma iman tii 1981, maxaa yeelay, waxay ahayd mid ku talagalkeedu ku fadhiyey baahida lagama maarmaanka ah. Kororsiimada ka muu qata tan 1982 waa mushaar iyo waxii la xiriira, makhaa siir mashaaric iyo kuwa kale oo ya khasab noqotay in aan laga tegin. Haddii aanu wada aqbali lahayn dalabka Hay'adaha oo macquul ahaa, miisaaniyaddan idin hor taalla si weyn ayey u dhaafi lahayd heerkey hadda joo gto, taasoo keeni lahayd kharaj aan dakhli loo hayn.

Inkastoo miisaaniyadda 1981 aan xisaabteeda weli la xirin, saa ay tahay, waxaan filaynaa in kharashkee da iyo dakhligeeda dhabta ahi ay isdaboolaan amase isku dhawaadaan.—

Deyntii kor u dhaafeysay laba milyaardi ee Banki ga Dhexe ku lahaa Dawladda gaar baan u dhignay oo Wasaaradda Maaliyadda iyo Bankiga Dhexe waxay gaa reen heshiis in deyntaa ay Dawladdu ku bixiso muddo 40 sannadood ah. Taasi waxay keenaysaa in Dawladdu dakhligeeda ay marwalba ku xisaabtanto oo ay harto caadadii ahayd in miisaaniyadda Dawladda si caadi ah looga kabaa Bankiga Dhexe.—

Sannadka 1982 kharashka miisaaniyadda loogu ta lagalay oo ah 3.130.403.710, kharajkaasoo u kala baxa inta loogu talagalay Wasaaradaha horumarinta dhaqa alaha oo dhan Sh.So.1.356,163,410 u dhiganta 44% Wa saaradaha daryeelidda bulshada oo makhaasiirtoodu dhan tahay Sh.So. 474.234.410 ee u dhiganta 15% Wasaa radaha iyo Hay'adaha u qaybsan Siyaasadda iyo Nabad gelyada oo qeybta ku baxeysa ay dhan tahay Sh. So. 1.300.005.890 una dhiganta 41%

Ku 1982, waxaan ku
sida la aha o, maxaa
ye
badan ku e ana

tarla». Waxaan ku kalsoonahay in Hoggaanka Ilaalin ta Canshuuraha uu tiro iyo tayaba sii xoogeystaa si uu ugu fulaado waajibaadka qaran ee sida gaarka ah Cii danka Boliiska ka saaran ilaalinta Canshuuraha Daw ladda. Bixinta iyo ilaalinta canshuuraha waa waajib qof kasta oo Soomaali ah Qaranku ku leeyahay.—

MIISAANIYADAHA WAKAALLADAHA

Miisaaniyaddan cusub waxaa ka muuqata dakhli ga iyo kharashka ee Wakaaladaha, kuwaasoo Wasaa radda Maaliyaddu ay kala dooday madaxda Hay'ada haasu horumarinta dakhligooda iyo makhaasiirtooda caalinga ah oo aad loo dhimo. Sida la ogyahay dhibaa tooyin xoog leh ayaa ka taagan maamulka Wakaalad daha balidood waana tan kenta in dhowr Wakaaladood la baabi'iyo. Dhibaatada ka taagan maamulka Wakaala daha aad bey u ballaaran tahay waxayna dooneysaa in si dhab ah wax looga qabto. Taasoo Dawladdu ay ku tala jirto sannadka soo socda.—

MIISAANIYADDA DAWLADAHA HOOSE:

Dakhliga iyo kharajka Dawladaha Hoose waxay ku cad yihiin miisaaniyadda, iyadoo la tixgeliyey baahid ooda iyo dakhligoodaba. Dakhliga guud ee Dawladaha Hoose ay fili karaan inuu soo galo sannadka 1982 cada diisu waxaa weeye Sh.So. 260.344.000, kharajka ku bixi doono sannadka soo socda waxaa weeye Sh.So. 283.561. 000 faraqa u dhexeeya labada xisaabood oo ah Sh.So. 23.217.000 waxaa laga kabayaa Miisaaniyadda Dawlad da Dhexe.

DIB U HABEYNTA DHAQAALAHA IYO ILAALINTA QIIMAHA SHILINKA.

Sannadkan Dhammaaday 1981 Dawladdu tilaaboo yin wax ku ool ah ayey ka qaaday dib u habeynta Dha qaalaha iyo ilaalinta qiimaha Shilinka iyadoo loo dar yeelayo xoojinta wax soo saarka, Dhiirigelinta iyo suu ragelinta hoos u dhaca ascaarta. Tilaabooyinka dib u habeynta Dhaqaalaha waxay bilaabmeen sannadkan

Wakaaladoodna la baabi'iyo midna ascaarteeda Iibsiga la siyaadiyey si loo geesigeliyo wax soo saarka, miraha Cuntada beeraadka (sida galleyda, mesegada, sisinta IWm.)

Tilaabadaas hore waxaa iyana daba joogtay inay lágama maarmaan noqotay joojinta habka ganasiga «Franco Valuta» ee Dalka ku waday dhaawac aan ka kabsi lahayn xag dhaqaale iyo xagga maciishadda nolo sha Bulshada.

Saa aawadeed, laga bilaabo 1da Lulyo ee sannadkan Dawladdu waxay go'aamisay in la joojiyo habkaa ganac si ee fawdada ah oo loo noqdaa ku isticmaalka dariiqa Bunuukta. Arrin sahlan ma ahayn oo waxay u baahatay in mawqaf adag Dawladdu iska taagto ku sii dhaqanka habkaa «Franco Valuta» ilaa ay qasabtay in loo soo de jyo sharci dabagooya. Joojinta habka Franco Valuta waxaa lala barbar socodsiiyey wax ka qabadka sarifka Shilinka Soomaaliyeed marka loo eego Dollarka iyadoo micnuhu yahay in la geesigeliyo wax soo saarka Beera ha iyo Warshadaha. Sidoo kale dibed u dhoofinta waxa inoo baxa ama aannu dhaqanno. Dhiirigelinta soo xawi lka lacagta adag. Daryeelid gaar ahaaneed loo yeeshay ascaarta cuntada. Daawada, socodsiinta Warshadaha iyo wax soo saarka Beeraha. Sida la ogsoon yahay wa xaa la dejiyey laba suuq ee sarifka oo lagu kala qaybi yey wixii daruuri u ah nolosha qofka iyo tacab soo saar ka iyo wixii kale ee guud ahaan loo isticmaalo. Fulinta borogaraankaas dhaqaale ee saas u ballaaran waxaa dan noqotay in Dawladdu ay la kaashato Hay'ado Caa lami ah oo ay xubin ka tahay, kuwaasoo ah Sanduuqa Lacagta ee Adduunka (International Monetary Fund) iyo Sanduuqa Lacagta ee Wadamada Carbeed (Arab Monetary Fund). Labadaa Hay'adood waa ay ku garab taagan yihiin Dawladda dib u toosinta dhaqaalaha Dal ka xag talo iyo xag taageerenba.—

Natiijooyinka ka soo baxay dib u toosinta dhaqaala ha waa wax durbaba muuqda marka laga eego sida. As caarta alaabta muhiimka u ah nolosha dadweynaha,

ka oo boqolkiiba sodon hoos u dhacay muddo gaabin gudaheed oo aan ku kalsoonahay inuu hoos u sii dhici dhici doono, qiimaha shilinka Soomaaliyeed oo kor u kacay marka la eego suuqyada Wadamada aanu deriska nahay ama nagu dhow, marxaladda Miisaaniyadda Dibedda ee Dalka oo siday bilo horteed ku sugnayd si dhii can uga soo wanaagsanaatay.—

MAAMULKA SIYAASADDA MIISAANIYADDA DA/DA

Miisaaniyadda Dawladdu waxay sal u tahay guud ahaan dhaqaalaha Dalka, khaas ahaanna waxay saameyn ascaarta iyo miisaaniyadda Dibadda. Haddii Miisaaniyaddu ay ku dhisan tahay dakhli iyo kharaj is waafaqsan, kharajkeeduna ahmiyad weyn siinhayo dhaqaalaha iyo wax soo saarka, ascaar bararku welig i hoos b.. u jiri, xaaladda Miisaaniyadda Dibedduna way nagaagsanaan. Haddii Miisaaniyaddu kharajkeedu ka badno dakhliga ama ise makhaasiirteedu si xad dhaaf ah ugu dheeraado waxa aan ku saabsaneyn horumarinta wax soo saarka, waxaa imanayo in dhaqaaluhu curyaan mo, ascaar bararku xadka ka baxo, Miisaaniyadda Dibedduna dhibaato xun gasho oo markaa ay timaado in horusha dhaqbigu dhibaato ku sugnaato.—

Kor waxaan ku sheegnay maamul darrada ka ta.. gan Wasaaradaha, ku waa soo Dawladdu wax ka qabar.. doonto sannadka soo socda. Waxaa eyana loo baahan yahay in la adkeeyo tashiilka iyo kontoroolka makhaa siirta Wasaaradaha oo markaan dhabta ka sheego ku socon sida haboon. Makhaasiirta Wasaaradaha ma aha kaliya.. in lagu bixiyo wixii loogu talagalay ee waa inaan la bixin, haddii aanay jirin baahi lagama maarmaan ah oon dib loo dhigi karin. Dawladda waxay kal fadhiga dhow golaha keeni doontaa xisaabxirka sannadka 1981, halkaas oo laga daalacan doono sidey ku baxday Miisaaniyadda sannadkan dhammaaday.—

Sidoo kale, Miisaaniyaddu waa habka lagu fuliyo sannadkasta Qorshaha Qaranka loo dejiyo, Saa aawadeed, Wasaaradda Maaliyadda iyo tan Qorshuhu waa

inay si gaar ah la tashi joogta ah u leeyihiin si qorsha ha iyo Miisaaniyaddu had walba u wada socdaan.—

Dawladdu waa ay sii xoojin dib u habeynta iyo horu marinta dhaqaalaha si natiijooyinka bilowday ay u sii ba aartaan, si wax ku oolnima ahna u saameeyaan nolo sha shacbigayaga. Haddaba ololaha dhaqaale ee oogan waa inay shicib iyo dawladduba u wada duubtaan iya doo duulaan loo yahay ka salgaarid guul dhaqaale, guul bulshe iyo horumar siyaasadeed.—

WASIIRKA MAALYADDA

(Dr. Cabdulaahi A. Caddow)